

WAA MAXAY PURPLE LINE BRT?

Purple Line wuxuu soo jeedinayaa baska dheeraynaya ee ka gudbaya (BRT) khadka Degmada Ramsey kaas oo ku xidhi doona balaadhinta tareenada fudud iyo adeega BRT ee nidaamka METRO. Khadku wuxuu soo kordhin doonaa helitaanka shaqooyinka, guriyaynta, iyo adeegyada, kor u qaadista danaynta iyo u tartamida goobaha bari ee tareenada dhulka hoostiisa. Purple Line wuxuu si aasaasi ah ugu shaqayn doonaa isagoo qeybka ah ama qeyb aan ka ahayn khadadka, kaasoo siinaya gaadiidka dadweynuhu inuu noqdo mid aad loo aamini karo isla markaana dhakhso ah. Shaqaalaha mashruucu waxay raadinayaan fikrado ku saabsan beddelka dariiqa la door biday ee u dhexeeya Waddada Dheer ee Bruce Vento Regional Trail iyo Waddada Dheer ee White Bear Ave Corridor.

ISBARBARDHIGA WADDADA

Shaqaalaha Purple Line waxay daraaseeyeen dhawr dhinac oo ka mid ah waddooyinka White Bear Ave iyo Bruce Vento Regional Trail si ay uga caawiso inay ogaadaan dariiqa ay doorbidayaan ee badal noqon kara. Xagan hoose waxa ku xusan astaamaha muhiimka ah ee labada waddo.

WADDADA DHEER EE VENTO REGIONAL TRAIL

Maryland Ave ilaa Maplewood Mall loo maraayo Bruce Vento Regional Trail iyo Beam Ave

9.5 miles | 17 goobaha laga raaco

15 daqiiqaba soo noqonaya



3,800 oo rakaabka raacaya ah



\$370 milyan oo ah qiimaha kharashka lagu qiyaasay

- ✓ Ku habboon maalgalinta federaalka
- ✓ Saamayn yar ku leh hawlaha waddo marista ee mustaqbalka
- ✓ Saamayn yar ku yeelanaya dhismayaal kooban iyo in si dhakhso ah loo dhiso
- ✓ Wakhtiga safarka gaaban ee cidhif ilaa cidhifka kale
- ✓ Dhawr meelood oo lagu gaadhi karo 10-daqiiqo oo socod ah ama goobaha tareenada laga raaco
- ✓ Horumarka taageeridda gaadiidka oo yar
- ✓ Badalka astaamaha waddada oo ay ku jiraan in la hagaajiyo meelaha la marayo ee waddada lagaga gudbayo iyo meelaha waddooyinku iska jaraan

WADDADA DHEER EE WHITE BEAR AVENUE

Johnson Pkwy ilaa goota Maplewood Mall-ka loo Maryland Ave, White Bear Ave, iyo Beam Ave

11 miles | 24 goobaha laga raaco

15 daqiiqaba soo noqonaya




3,900–4,900 oo rakaabka raacaya ah



\$420–450 milyan oo ah qiimaha kharashka lagu qiyaasay

- ✓ Ku habboon maalgalinta federaalka
- ✓ Waxay inbadan saamaynaysaa hawlaha waddo marista ee mustaqbalka
- ✓ Waxay inbadan saamaynaysaa dhismayaasha iyo hoos u dhaca dhismaha
- ✓ Wakhtiga safarka dheer ee cidhif ilaa cidhifka kale
- ✓ Meelo badan oo lagu gaadhi karo 10-daqiiqo oo socod ah ama goobaha tareenada laga raaco
- ✓ Horumar badan oo taageeraya gaadiidka maraya
- ✓ Hagaajinta kaabayaasha waddooyinka iyo arafyada dadku marayaan iyadoo si dhammaystiran waddada dib loogu dhisaayo



Boogo metrotransit.org/purple-line fsi aad ugala socoto hababka soo socda ee aad ula shaqayn karto mashruuca iyo inaad iska diwaangaliso si aad u hesho warbixinada.

UJEEEDADA IYO BAAHIDA

U adeegida baahiyaha dadka ku tiirsan gaadiidka

Taageerista kuwa aan awooddin, aan karayn, ama doortay inaanay gaadhi kaxaysan.

Buuxinta baahida sii kordheysa ee gaadiidka la isku halayn karo, ee soo noqnoqoshada badan

Raacista adeegyada jira ee Basaska Dadweynaha ee Dheereeya wuxuu aad u xoogaystay intii lagu jiray xanuunkii COVID-19 oo wuxuu kasbaday rakaab badan oo si xawli ah u kordha marka loo eego adeegyada kale, taasoo ka tarjumaysa baahida loo qabo adeeg maalintii oo dhan ah, adeeg ujeedo kasta leh.

Khadadka la aamini karo ee BRT dheeraynaya hadda waxay qaateen 15% safarada gobolada.

Qorshaynta horumar joogto ah oo koritaan leh

Wax kaqabashada mashquulka badan ee waddooyinka iyadoo la balaarinayo adeegyada gaadiidka ee la aamini karo iyo hagitaanka gaadiidka, samaynta goobo dadku ku lugeeyaan.

Balaarinta doorashooyin badan oo lagu safri karo

Wax kaqabashada tayada hawada iyo neefaha kala duwan ee lasoo saaro iyadoo loo waceeniyo safarada baabuurta madaxa banaan kuwa gaadiidka dadweynaha.

FURSADAHA JAWAAB CELINTA SOO SOCOTA

Luulyo & Ogosto 2024

Nagulasoo biir kulamada bulshada iyo isku imaatinada kooban, nagala shaqee inaan si toos ah shaqsigu ula kulano, ama si onlaayn ah kula xidhiidhno si uu noo siiyo jawaab celin ku saabsan:

In Purple Line mara inta u dhaxaysa Waddada Dheer ee Bruce Vento Regional Trail ama Waddada Dheer ee White Bear Ave.

Dooroshooyinka khadka baska Purple Line maraya, ee ay ku jirto doorashada khadka dhexe ee basku marayo ee qeybta Saint Paul Waddada dheer ee White Bear Ave.

Sawir koodhka QR ama booqo wabsaaydka mashruuca si aad u bixiso jawaab celin onlaayn ah.



metrotransit.org/purple-line
Sibteembar 2024

Sii jawaab celino dheeraad ah oo ku saabsan badalka dariiqada doorbidayso ama nashqada Waddada dheer ee White Bear Ave adigoo u maraya mareegta mashruuca, iimayl, ama taleefoon.

JADWALKA GUUD AHAAN MASHRUUCA

2024–2026

Gogol xaadhka Dhismaha iyo Nashqada

2027–2029

Dhismaha iyo Bilaabista

Dhammaadka 2029

Bilaabista adeega

Mashaariicda tareenka BRT caqabado adag oo aan la filayn aya ka soo bixi kara. Jadwalka iyo wakhtiyada waa la beddeli karaa.

NALA SOCO



Boostada intarnetka ku rukumo wixii akhbaar ah:
metrotransit.org/purple-line



Farriin noogu soo dir:
purpleline@metrotransit.org



Nagala soo xiriir:
612-618-0495



Nagala soco:



@PurpleLineBRT

Haddii aad xiisaynayso inaad la kulanto shaqaalaha Purple Line soo booqo kooxaha ururada ka jira deegaankaaga, ururada bulshada, ganacsiyada, ama dhacdo, fadlan kalasoo xidhiidh.

If you need this information in an alternative format or language, contact:

Si necesita esta información en un formato o idioma alternativo, póngase en contacto con:

Yog koj xav tau cov lus no txhais uas lus hmoob lossis xav tau ib tus neeg pab txhais cov lus no rau koj, tiv tauj:

Haddii aad dooneyso in aad macluumaadkan ku hesho siyaabo kale ama afaf kale, la xiriir:

နမ့်သးအိဉ်းန့ၢ်ဘဉ်တၢ်စ့ၢ်တၢ်ကျိတဖၣ်အံၤလၢတၢ်ခံၣ်အကျိလၢတၢ်ကယုထၢတဖၣ်အံၤအဂီၢ်မ့တမ့ၢ်ကျိၣ်.ဆဲးကျဲ

Colin Owens

Iskuduwaha Xiriirka
Dadweynaha

612-618-0495

colin.owens@metrotransit.org